XAASHIDA XAQIIQDA

Agagaaraha Dabiiciga Ah

… Meesha carruurta aan lahayn talax-yaraantu ay wakhtigooda ku qaataan.

Sharcigu waxa u leeyahay…

Qaybta C ee ku saabsan Qanuunka Waxbarashada Shaqsiyaadka leh Talax-yaraanta Wax-ku-biirinteedi 1997 ayaa odhanaya in inta ugu badan ee ku habboon, adeegyada horey wax ug-qabashada waa in loogu fidiyo agagaraha dabiiciga ah, ooy ku jiraan guriga iyo goobaha beeshu ay leedahay ee carruurta aan lahayn talax-yaraanta ay ka qayb-galaan. Adeegyada waxa kaliya loogu fidin doona goob ka duwan ta agagaraha dabiiciga ah marka horey wax uga-qabashada si qanac leh loo kari waayo qabashadeeda agagaraha dabiiciga. Qaybta 632 (4)(G) iyo Qaybta 635 (a) (16) (B)]

Ugu fidinta adeegyada meelo ah agagaarada dabiiciga ah ma ha uun sharci kaliya. Waxay ka turjumeysa hadafka udub –dhexaad u ah horey wax uga-qabashada, oo ah in loo fidiyo qoysaska taageero iney ka caawiyaan carruurtooda si ay u kobcaan inta kartidooda ah ee ugu badan, ee waliba u oggolaaneysa carruurta iyo qoysaskaba iney si dheeraad ah oo buuxda uga qayb qaataan beelahooda. Waxaan ogaaney waxyaabo badan oo muhiim ah oo ku saabsan sida carruurta aadka u yar-yar, kuwa socod-baradka ah iyo qoysku ay uga faa'iideysan lahaayeen hore wax uga-qabashada.

Waxaan Ogaaney iney…

- Qoysasku ka qayb-qaataan kuwa badan oo ah, fursado waxbaritaan maalinta oo idil laakin badiyaa loo aqoonsan qiimaha "walaxda" nolol maalmeedka. Carruurta da'da yari waxay sida ugu wanaagsan ee wax ku bartaani waa iyada oo la baro xirfadaha ay ka mid yihiin wax cunitaanka, ciyaarta, dhaqdhaqaaqa, iyo wada xidhiidhka wakhtiyada iyo goobaha ay uga baahan yihiin iney wax ku cunaan, socdaan ama hadlaan.

- Xubnaha qoysku iyo kuwa kale daryeel fidiyeyaasha ah ay u baahn yihiin taageero sidii ay ugu fidin lahaayeen carruurta fursado waxbarasho. Horey wax uga-qabashadu waxay ka gargaari kartaa iney ka caawiyaan ilmahoodu iney helaan xirfadaha ay u isagu/iyadu u baahanyahay/tahay. Xirfadaha cusub waxa sida ugu fiican looga bartaa dadka iyo meelaha ilmuhu u jecel yahay. Sida dhaqanka ah ee qacan-ku-qabashada ah, ee ku hagaagga tooska ah terabi loo siiyo kuma filnna carruuta. Dhammaan daryeel fidiyeyaashu waxay u baahan yihiin in kalsoonida lahaadaan carruurta laga caawiyo iney ku barbartaan xirfadaha goobaha ay ku nool yihiin, wax ku bartaan, ku ciyaaraan, iyo mararka qaarkood maalinta oo idil.

- Asxaabta, jaarka, fidiyeyaasha daryeelka ilmaha, kooxa ciyaaraha, goobaha diinta, maktabadaha, iyo kuwa kale ee taageereyaasha beesha ah ayaa kor u qaadi kara tayada nolasha qoys kasta. Adeegyada lagu fidiyo agagaaraha dabiicigu waxay taageeraan oo ay dhiirri galiyaan qoysaska sidii ay u heli lahaayeen ooy u xoojin lahaayeen taageeroyinka dabiiga ah ee ka baxsan nidaamka hore wax uga-qabashada. Tageerooyinkan oo la sameeyey markii uu ilmuhuu yaraa, ayaa ugu badan iney jiraan inta isga/iyada dugsiga ay dhigtaan iyo qof weyn ay noqonayaanba.

- Carruurta da'da yar ee leh di-u-hadhka ama talax-yaraanta ayey ku adag tahay iney geystaan wixii ay ku barteen qolka terabiga ama fasalka gaarka ah oo ay u wareejistaan goobaha ay ka midka yihiin jardiinooyinka (park) ama qolka hore ama meesha ilmaha lagu hayo ee goob diineedka ah.

- Carruurta aan la siin horey wax uga-qabashada agagaaraha dabiiciga ah ayey ugu badana tahay in ay markey weynaadaan noloshooda ku noolaadaan oo ku shaqeeyaan meelo gooni ah.

Ugu Fidinta Adeegyada Agagaaro Dabiiciga ahi waa …

- Ka caawinta qoysaska iney u fidiyaan fursado baritaan iyo kuwa barasho oo ilmahooda iyada oo lagu dhex jiro waxqabadyo, waxa aala caadiga loo sameeyo iyo dhacdooyinka maalin kasta ah ee nolosha;
- U kordhinta fursadaha DHAMMAAN carruurta oo idil loogu fidin lahaa waxbarasho, ciyaar, is dhex-galka;
- Ka caawinta qoysasku iney dhistaan xidhiidh qumman iyo saaxiibtinnimo waarta nolsha dhexdooda iyo beesha la wada xidhiidhkooda.
- Taageeridda fursdaha wax barashada ee ilmuhu isticmaalayo isla markaaba xirfadaha, oo ka mid yihiin cuntada marka la cunayo, baabuurka lagu socdo, dharka la xidhanayo, iwm.;
- Kordhinta yeelashada dareen beeled iyada oo la isku xidhayo qoysaska iyo ilaha taageero ee dabiiciga ah, ooy ka mid yihiin saaxiibbada, jaarka, iyo xubnaha goobaha diineed.

Ugu Fidinta Adeegyada Agagaaro Dabiiciga ahi KAMA Dhignna …

- Ugu fidinta kaliya adeegyo guri-ku-dhisnnaan ah. Adeegyada waxa loogu fidin ilmaha sida ugu habboon ee taageerada agagaarha ah.
- Ku meeleynta carruurta goob carruur kale joogaan iyada oon jirin taageero iyo adeegyo habboon. Kooxda IFSP ayaa soo saarta oo hir-galisa qorshe qofqof loogu talagaley oo u fidisa ilmaha wax ka-qabasho kaliya uun maahe, walibalaakiin la taliska iyo tababarka daryeel u fidiyeyaasha ilmaha goob kasta.
- Ka sugitaanka qoysku iney fidiyaan adeegyada oo idil. Qoys kastaa waxay leeyihiin baahi, ka welwel, iyo karti u gaar ah oo ku dhex jira IFSPga.
- Ka yareynta fursado ay ku wada shaqeeyaan xubnaha kooxdu. Fursado ay kooxdu ula wada shaqeeyaani dhammaan daryeel fidiyeyaashu waa u muhiim guuleysiga ku bixinta adeegyada agagaaraha dabiiciga ah.
- U diididda qoysaska iney wada xidhiidhaan oo ay ka heelaan taageero waaliddada kale ee leh carruurta talax yaraanta leh. Fursado ayaa loo fidiyaa beesha ka mid oo leh waxqabadyo badan.

Taageero Qoys:

Ka rabitaanka in adeeyada lagu bixiyo agagaaro dabiici ah kama dhiganna in Ubadku Ma-sugi Karaan ayna caawin karin in waalidku la kulmmaan waalidka kale ee leh carruur is kaga mid ah dib-u-hadhka iyo talax-yaraanta. Taageerada waalidka iyo tababarku loo fidin kara ama waa in loo fidiyo marka waalidku rabaan ama u baahan yihiin. Adeegyada taageeradu waxay ka dhici kartaa xafiiska Ubadku Ma-sugi Karaan, telefoonka, maktabadda, guriga waalidka, ama internetka, iwm. Dadka shaq-aqooneedka ku leh ilmaha dhasha ah iyo kuwa socod-baradka ah waa iney ka caawiyaan waalidkau iney helaan ilaha taageerooyinka ee ku yaal xaafadahooda ama beeshooda..

Haddii macluumaad dheeraad oo ku saabsan agagaaraha dabiiga ah aad u baahato, la xidhiidh Isku-duwaha adeegyada UMK, Isku Duwaha deeganka Horey Wax Uga-qabashada (Ubadku Ma-sugi Karaan), UMK Waalid Waxbare, ama xafiiska Ubadku Ma-sugi Karaan ee Gobalka (404-657-2726 ama lacag la'aan toll 888-651-8224).

Waxa soo saarey ooqaybieyey Guddiga Wakaalada ha-wada shaqeyntooda iyo Isku-duwidda Gobalka Joorjiya si adeeg ay ugu noqoto carruurta da'da yar ee leh talax-yaraanta iyo shaqaalaha horey wax uga-qabashada iyo fidiyeyaasha.

La Nakhtiimey 4/27/99

DHR
GEORGIA DEPARTMENT OF HUMAN RESOURCES